



Tr: 13/09/2016

Mawqifka Bulshada Rayidka ah (PUNSAA) ee Colaadda ka jirta Magaalada Gaalkacayo iyo guud ahaan Gobolka Mudug (Position paper)

Dalladda Bulshada Rayidka ee PUNSAA waxaa ay aad uga walaacsan tahay Colaadda ka taagan Gobolka Mudug iyo Ammaan darada ka jirta Magaalada Gaalkacayo oo ah wax ka baxsan dadnimada, taas oo aan indhaha laga qabsan karin. Waa meel ay isku biirsatay khilaafaad siyaasadeed, qabyaalad iyo nebcaan dadka la isugu beeray iyadoo loo maray sheekooyin khiyaali ah oo la isugu bahalageliyey. Dar xumada iyo niyad jabka ka jirta Magaalada Gaalkacayo iyo guud ahaan gobolka mudug waa mid gubeysa qalbiga qofkasta oo damiir leh, aragga iyo maqalkuna aaney jeclaysaneyn.

1. Mudug iyo Gaalkacayo waa Gobolka iyo Magaalada keliya ee dalka Soomaaliya Reer hebel la isu laayo.
2. Gaalkacayo waa maagalada keliya ee leh khad cagaaran oo aaney dadweynuhu isu gudbikarin ee laba u qaybsan.
3. Waa Gobolka iyo Magaalada keliya ee laba maamul oo colaadi ka dhexeysaa ka dhisanyihiin.
4. Waa meesha keliya ee ay qaybsanyihiin adeegyada Waxbarasho iyo Caafimaad oo goobaha waxbarashada iyo goobaha Caafimaadka aan la wadaagin.
5. Waa meesha aaney cidina baarin waxa xudunta u ah khilaafaadka, si xal loogu helo.
6. Waa meesha aaney jirin cid xil iska saartay in ay damiso colaadda iyo in si hufan oo daacdnimo leh loo dhex galo labada qaybood ee is haya.

Dawladda Federaalka oo masuuliyad xooglihi ka saarantahay heshiisiinta iyo nabadeynta beelaha Soomaaliyeed far uma dhaqaajin, wax tixgelin ahan ma siin guud ahaan nabadeynta Soomaalida iyo gaar ahaan gobolka Mudug iyo magaalada Gaalkacayo. Waxaa hibaal ah in sidaan oo kale aaney Dawlad Goboleedyada Puntland iyo Galmudug hoose u eegin xaaladda ka sii daraysa ee gobolka. Waxaa inta badan colaadda hurinya khilaafaadka iyo muranka siyaasadeed ee u dhexeeya madaxda labada Dawlad Goboleed.

Sidaan darteed waxa mawqifka Dalladda Bulshada Rayidka ah ee PUNSAA uu yahay:

1. Waa in labada Dawlad goboleed ee Puntland iyo Galmudug ay raali ka noqdaan in ay kawada shaqeeyaan xalinta khilaalaafaadka iyo colaadda ka jirta Gaalkacayo iyo guud ahaan gobolka Mudug.

2. Waa in meesha laga saaro khilaafka siyaasadeed ee ku dhex jira labada Dawlad Goboleed si ay u fududaato in la soo af jaro colaadda mudadda dheer ka taagneyd Mudug.
3. Waa in labada Maamul u midoobaan ilaalinta nabad geliyada Gaalkacayo iyo guud ahaan gobolka
4. Waa in in la joojiyo af-xumada iyo ereyada hurinaya colaadda ee ka baxa saxaafadda oo inta badan ay ku hadlaan dad aan shuqulba ku lahayn Mudug oo aan ka xanuunsanayn dhibaataada iyo xaaladda dhabta ah ee ka jirta Gaalkacayo.
5. Waa in labada Dawlad Goboleed la yimaadaan Nabadayn iyo farsamo la isugu furo magaalada;
6. Waa in la joojiyo dilka iyo geelaha la kala dhacayo, islamarkaasna la isu celiyo kan hadda la kala haysto.
7. Waa in la sameeyo boolis isku dhaf ah oo ka shaqeeya ilaalinta Amniga magaalada
8. Waa in la sameeyaa ciidamo isku dhaf ah oo awood u leh in ay soo qabtaan dadka dhibaatooyinka ka geysta miyiga;
9. Waa in labada Maamul isu gudbiyaan dembiilayaasha.
10. Waa in ugu damaynta ay magaalada Gaalkacayo yeelato helo hal maamul oo wadaag ah oo ay labada Dawlad goboleed heshiis ku yihiin.
11. Waa in Beesha Caalamku dowr weyn oo gaar ahaan xagga dhaqaalaha ka qaataan xalinta khilaafaadka beelaha wada dega iyo colaadda ka jirta Magaalada Gaalkacayo iyo guud ahaan Gobolka Mudug.

Guddoomiyaha Dalladda PUNSAA

Nuur Shire Cismaan

